Taariikhda saameynta: **Febraayo 4, 2026**

HOWARD CENTER
Help is here.
*Caawin* ***waatan***

# Ogeysiin Ficilladda Shaqsiyeed

**Ogeysiintaan waxay sharaxeysaa sida macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan u dhici karto in la isticmaalo lanna soo bandhigo iyo sida aad fursad ugu yeelan karto macluumaadkan. Fadlan si taxadir ah u dulmar.**

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ee ku saabsan ogeysiintan, fadlan kala xiriir sarkaal Shaqsiyeedka HowardCenter (802) 488-6900

## YAA RAACAAYA OGEYSIINTAN

Ogeysiintaan waxay sharaxeysaa ficilladeenna iyo kuwa:

- Xirfadle kasta ee daryeel caafimaad ee loo ogolaaday inuu eego macluumaadkaaga warbixin ee caafimaadkaaga.
- Dhammaan qeybaha iyo mashaariicda Howard Center.
- Mutadawace kasta ee aan u ogolaanay inuu ku caawiyo inta aad ka heleyso Howard Center hawlgalyo.
- Dhammaan shaqaalaha, saraakiisha iyo hawlwadeenadda kale.
- Dhammaan unugyadda Howard Center, baraha iyo goobaha raacaaya xeerrarka ogeysiintaan. Xubnaha shaqaalaha unugyadaan, barahaan iyo goobahaan laga yaabee in ay isla qeybsadaan macluumaad caafimaad midkood midka kale daaweynta, kharsh bixinta ama ujeedooyinka hawlgalladda sida lagu sharaxay ogeysiintaan.

## BALLAN QAADYADEENA LA XIRIIRA MACLUUMAADKA CAAFIMAAD

**Waan fahansannahay in macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan iyo caafimaadkaaga in uu yahay shaqsi. Waxaan daacad u nahay in aan xafidno shaqsiyadaada iyo macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan.** Waxaan abuureynaa warbixin daryeel iyo hawlgalladda aad ka heleyso hayadda. Waxaan u baahannahay in warbixintaan ay ku siiso tayda daryeel iyo tixgelinnada sharciyadda qaar ee loo baahan yahay. Ogeysiintaan waxay la xiriirtaa dhammaan warbixinnadaada ay sameysay hayadda, haddii uu sameeyay hawlwadeen hayadda ama dhakhtarkaaga qaaska ah. Dhakhtarkaaga qaaska ah wuu lahaan karaa qorshooyin ka duwan ama ogeysiinno la xiriira isticmaalka dhakhtarka iyo bandhigidda macluumaadka caafimaadkaaga ee lagu sameeyay xafiiska dhakhtarka ama xarun caafimaad.

Ogeysiintaan waxay kuu sheegi doontaa qaababka ku saabsan ee aan u isticmaaleyno una bandhigeyno macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan. Xittaa waxaan ku sharaxeynaa xaquuqdaada iyo qaar ka mid ah masuuliyadaha ee aan kula xiriirineyno isticmaalka iyo bandhigidda macluumaadka caafimaad.

Sharciga wuxuu nooga baahan yahay in:

- Aan xaqiijinno in macluumaadka caafimaad ee ku cadeyneysa si qarsoodi ah loo xafido;
- Ku siinno ogeysiintaan ah shaqadeenna sharci iyo ficilladda shaqsi anagoo xurmeyneyna macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan;
- Tixraacidda xeerarka ogeysiinta oo hadda dhaqan galeysa;
- Kuu cadeyno tixraacidda ku xadgudubka amaandarada xifdinta macluumaadka caafimaad; iyo
- Tixgelinta mid kastoo ka mid ah shariyadda dowladda kaasoo aad halis u ah ama ku siinaaya xaquuq ka badan kan ogeysiintaan.

## SIDA AAN U ISTICMAALEYNO IYO AAN U BANDHIGEYNO MACLUUMAADKA CAAFIMAAD EE KUGU SAABSAN

Howard Center waxay bixisaa taageerooyin iyo adeegyo lagu daboolayo baahiyaha caafimaadka maskaxda, isticmaalka maandooriyaha, iyo baahiyaha horumarineed.

Waxaad xaq u leedahay inaad oggolaato in barnaamijkeennu isticmaalo oo shaaciyo diiwaannada daaweyntaada ee la xiriira isticmaalka maandooriyaha ujeeddooyinka daaweyntaada, bixinta kharashaadka, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, si waafaqsan HIPAA. Marka aad bixiso oggolaanshahan, diiwaannadan waxaa lala wadaagi karaa bixiyeyaasha ku daaweynaya, qorshayaasha caymiska caafimaadka, bixiyeyaasha dhinac saddexaad, iyo kuwa ka caawinaya hawlgalinta barnaamijkan, sidoo kalena waxaa loo sii shaacin karaa sida ay oggol yihiin xeerarka HIPAA.

Haddii aad na siiso oggolaansho aan kula wadaagno diiwaannadaada daaweynta isticmaalka maandooriyaha ee la xiriira daryeelkaaga, bixinta kharashaadka, ama hawlaha daryeelka caafimaadka, bixiye kasta ama qorshe caymis caafimaad oo helo diiwaannadaada khasab kuma aha inuu ka sooco macluumaadkaaga kale ee caafimaadka. Looma baahna in diiwaannadan si gooni ah loo hayo. Macluumaadkaaga la xiriira isticmaalka maandooriyaha wuxuu ka mid noqon karaa diiwaankaaga caafimaad ee caadiga ah.

Diiwaannadaada daaweynta isticmaalka maandooriyaha looma adeegsan karo ama looma shaacin karo dacwooyin sharciyeed oo kaa dhan ah adiga oo aan haysan oggolaanshahaaga qoran ama amar maxkamadeed oo gaar ah. Waxaad xaq u leedahay inaad ka noqoto oggolaanshahaaga wakhti kasta adigoo qoraal ah, hase yeeshee tani saameyn kuma yeelan doonto shaacinta horey loo sameeyay iyadoo lagu tiirsanaa oggolaanshahaaga.

Qeybaha soo socda waxay faahfaahinayaan qaababka kala duwan ee aan u isticmaaleyno una soo bandhigeyno macluumaadka caafimaad. Qeyb kasta oo isticmaalyo ah ama bandhigidyo waan sharixi doonnaa waxaan ula jeedno iskunna dayi doonnaa inaan ku siinno xoogaa tusaalooyin ah. Ma ahin in isticmaal ama bandhig walba ee qeybahaan in halkaan lagu taxay.

**Daaweynta**. Waxaan isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan kuu siino daaweyn ama adeegyo. Tan waxaa ka mid ah suurtagalnimada in macluumaadkaaga lala wadaago dhakhaatiir, kalkaaliyayaal, xirfadlayaal caafimaad, maamulayaasha kiisaska, tababarayaal (interns), ama shaqaale kale oo ka tirsan hay'adda, ama bixiyeyaasha ka baxsan hay'adda ee ku lug leh daryeelkaaga sida dhakhtarkaaga guud (PCP), dhakhtarka ilkaha, iwm. Tusaale ahaan, xirfadle caafimaad ayaa laga yaabaa inuu kuu daweynayo dhibaato la xiriirta caafimaadka maskaxda ama isticmaalka maandooriyaha, isla markaana u baahdo inuu la hadlo mid ka mid ah dhakhaatiirteena cilmi-nafsiga ama xirfadle kale oo leh tababar khaas ah oo ku saabsan qayb gaar ah oo daryeel ah. Sidoo kale, waxaan shaacin karnaa macluumaadkaaga dadka ka baxsan hay'adda ee ku lug leh daryeelkaaga caafimaad.

Danab Isku Weydaarsiga Macluumaadka Caafimaadkaaga – dhacdooyinka qaar, waxaa laga yaabaa in aan ku gudbinno macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan Dannab ahaan kuwo kale oo bixiya daryeel caafimaadoo ku siinaaya daaweeyn ama qorsho ceymis bixinaaya kharash bixinta daaweyntaada. Macluumaadkaaga caafimaad xittaa laga yaabee in laga dhigo mid laga heli karo dhammaan Isweydaarsiga Macluumaad Caafimaad ee Vermont ("VHIE"). VHIE waa shabakad macluumaad caafimaadka gobolka loo xilsaaray ee ka hawlgala Vermont Information Technology Leaders, Inc. (VITL). Daaweeyntaada daryeel caafimaadna bixiyayaasha waxay fursad u leeyihiin oo keliya macluumaadkaaga caafimaad oo ay u maraayaan VHIE, illaa aad dooratid inaad ka baxdid VHIE iyo, uma baahnid daaweyn deg deg ah. Macluumaadka ku saabsan VHIE, eeg www.vitl.net."

**Kharash Bixinta.** Waxaan isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaad si daaweynta iyo adeegyada aad ka hesho hay'adda loo oggolaado, loo diro biil, loogana helo lacag dhinac saddexaad sida shirkad caymis. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan siino qorshahaaga caafimaad macluumaad ku saabsan la-talin aad ka heshay hay'adda si qorshahaaga caafimaad uu noogu bixiyo ama kuu soo celiyo lacagta kulanka la-talinta. Sidoo kale, waxaan u sheegi karnaa qorshahaaga caafimaad daaweyn aad heli doonto si aan u helno oggolaansho hore ama u go'aamino in qorshahaagu daboolayo adeegga/daaweynta. Waxaan kaa codsan doonnaa inaad saxiixdo foom oggolaansho ah si aan ugu oggolaanno in aan ku dalacno shirkaddaada caymiska daaweynta la xiriirta isticmaalka maandooriyaha ee lagu bixiyo.

**Hawlgalladda Daryeelka Caafimaad.** Waxaan u adeegsan karnaa oo shaacin karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan hawlaha hay'adda. Adeegsiga iyo shaacintaas waa kuwo lagama maarmaan u ah socodsiinta hay'adda iyo hubinta in dhammaan dadka ka helaya adeegyo ay helaan daryeel tayo leh. Tusaale ahaan, waxaan u adeegsan karnaa macluumaadka caafimaadka si aan u eegno daaweynta iyo adeegyada aan bixino, isla markaana u qiimeyno waxqabadka shaqaalaheenna marka ay kuu adeegayaan. Sidoo kale, waxaan isku dari karnaa macluumaadka caafimaadka ee macaamiil badan si aan u go'aamino adeegyo dheeraad ah oo aan bixin karno, adeegyo aan loo baahnayn, iyo in daaweyno cusub oo gaar ah ay waxtar leeyihiin iyo in kale. Intaa waxaa dheer, waxaan macluumaadka la wadaagi karnaa dhakhaatiir, kalkaaliyeyaal, xirfadlayaal caafimaad, maareeyayaasha kiisaska, tababarayaal, iyo shaqaale kale oo ka tirsan Howard Center ujeeddooyin dib-u-eegis iyo waxbarasho.

Waxaan sidoo kale isku dari karnaa macluumaadka caafimaadka ee aan hayno iyo macluumaadka caafimaadka ee ka imanaya hay'adaha kale ee bixiya adeegyada si aan isu barbar dhigno sida aan u shaqeyneyno una ogaano meelaha aan ka horumarin karno adeegyada aan bixino. Waxaan ka saari doonnaa xogta kuu gaar ah ee lagu aqoonsan karo macluumaadkan caafimaad si dadka kale ay ugu isticmaali karaan daraasaynta daryeelka caafimaadka iyo hababka bixinta daryeelka, iyaga oo aan ogaan cidda ay yihiin macaamiisha gaarka ah. Si loo fududeeyo dib-u-eegistan, waxaan macluumaadka siinaynaa keyd xogeed oo lagu maamulo heshiis Business Associate Agreement ah oo lala leeyahay Vermont Care Network, si loo ilaaliyo qarsoodiga macluumaadka.

Howard Center waa hay'ad bixisa adeegyo oo heshiis la leh Dowladda Gobolka Vermont si ay u bixiso adeegyo ay ka mid noqon karaan adeegyada caafimaadka maskaxda ee bulshada, adeegyada naafonimada horumarineed, iyo adeegyada la xiriira cilladaha isticmaalka maandooriyaha, waxaana nagu waajib ah heshiisyada aan la leenahay waaxyaha kala duwan ee ka tirsan Vermont Agency of Human Services (AHS) inaan bixino adeegyadaas. Sidaas awgeed, waaxyahan waxay heli karaan macluumaadka caafimaadka ee la xiriira adeegyada heshiisyadaas loogu bixiyo, ujeeddooyin ay ka mid yihiin helidda daaweyn loogu talagalay macaamiisha, bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadkooda. Intaa waxaa dheer, waxaan macluumaadka caafimaadka siin karnaa AHS ee ku saabsan macaamiisha aan lagu maalgelin dowlad-goboleed, iyadoo la raacayo heshiis xaddidaya isticmaalka macluumaadkaas oo ku kooban xog demograafiyeed oo aan ahayn daryeel caafimaad, si loogu adeegsado hawlaha daryeelka caafimaadka iyo kormeerka caafimaadka ee AHS.

**Xasuusinta Ballannadda.** Laga yaabee in aan isticmaalno soo bandhignana macluumaadka kula soo xiriirno sidii xasuusin ahaan in aad leedahay ballan.

**Daaweynno kale oo u Dhigma iyo Faa'idooyinka iyo Hawlgalladda.** Waxaan u adeegsan karnaa oo shaacin karnaa macluumaadka adiga kugu saabsan si aan u helno una kugula talinno xulashooyin kale oo daaweyn ah iyo adeegyo la heli karo, iyo sidoo kale faa'iidooyin ama adeegyo kale oo la xiriira caafimaadka..

**Waxqabadyadda Maaliyad-aruurinta.** Hadday baahi timaado halka macluumaadka kugu saabsan ama halka aad ka qeybgaleyso ay hayadda u baahato waxqabadyadda maaliyad-aruurin, hayadda waxay sugi doontaa ogolaanshahaaga. Macluumaad ma loo sii dayn doono sababtaan ogolaansho la'aantaada

**Cilmi baaris.** Xaalado aad u xaddidan oo gaar ah awgood, waxaan u adeegsan karnaa ama shaacin karnaa macluumaadka caafimaadka ujeeddooyin cilmi-baaris. Tusaale ahaan, mashruuc cilmi-baariseed ayaa ku lug yeelan kara isbarbardhigga caafimaadka iyo soo kabashada dhammaan macaamiisha helay hal nooc oo dawo ah iyo kuwa helay dawo kale, isla xaalad caafimaad awgeed. Dhammaan mashaariicda cilmi-baarista waxay hoos yimaadaan hannaan oggolaansho gaar ah. Hannaankan wuxuu qiimeeyaa mashruuca cilmi-baarista ee la soo jeediyay iyo sida loo adeegsanayo macluumaadka caafimaadka, isagoo isku dheellitiraya baahiyaha cilmi-baarista iyo baahida macaamiisha ee ah ilaalinta asturnaanta macluumaadkooda caafimaad. Ka hor inta aanan adeegsan ama shaacin macluumaadka caafimaadka cilmi-baaris awgeed, mashruuca waa inuu marka hore ku ansaxay hannaankan oggolaanshaha cilmi-baarista. Si kastaba ha ahaatee, waxaan u shaacin karnaa macluumaadka caafimaadkaaga dad diyaarinaya fulinta mashruuc cilmi-baariseed; tusaale ahaan, si ay uga caawiso inay raadiyaan macaamiil leh baahiyo caafimaad oo gaar ah, iyadoo shardi ah in macluumaadka caafimaadka ay eegayaan uusan ka bixin hay'adda. Mar walba waxaan ka codsan doonnaa oggolaansho gaar ah haddii cilmi-baarehu heli doono magacaaga, cinwaankaaga, ama macluumaad kale oo muujinaya aqoonsigaaga, ama haddii uu ku lug yeelan doono daryeelkaaga ee hay'adda.

**Sida uu Sharciga Doonaayo.** Waxaan bandhigeynaa macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan haddii ay u baahato federaalka, dowladda ama Sharciga madaniga. Vermont gudaheeda, tani waxaa raacsan: dhibanayaasha, la dayacay ama dadka waaweyn oo liita la isticmaalay; halka cunug ka yar lex iyo toban jir yahay dhibane dembi; iyo dhaawacyadda la xiriira rasaasta qoryahay. Xaaladdaha qaarkood, Waaxyaha ka tirsan hayadda Vermont ee hawlgalyadda Aadami kuwaasoo aan qandaraassiinay fursadda u lahaanshaha macluumaad caafimaad si ay u fuliyaan masuuliyadahooda Waxaa nalooka baahanyahay inaan u siideyno warbixintaada caafimaad adiga iyo qof walba ee aad uga codsatid ogolaanshaha qoran ee aad aad ku heshid

**Ka Leexinta Halista iyo Qatarta halis ah oo dhici doonta ee caafimaad ama badbaado.** Laga yaabee in aan isticmaalno bandhignana macluumaad caafimaad ee kugu saabsan haddii ay lagama maarmaan noqoto si loogu hortago qatar halis ah oo ku dhici doonta caafimaadkaaga iyo badbaadadaada ama qatar halis dhab ah ee qofka la aqoonsan karo ama kooxda dadka. Bandhigid kasta, si kastaba ha ahaatee, waxay ahaaneysasaa oo keliya qof sida macquulka ah u aaminsan inuu awooda inuu caawiyo ka hortagga halista.

MARXALLADDAHA QAASKA AH

**Ciidan iyo Hawlgabeyaal Ciidan.** Haddii aad tahay xubin ka tirsan ciidanka xoogga, laga yaabee in aan u sii daayno macluumaad caafimaad ee kugu saabsan, haddii looga baahdo maamulka taliyahay ciidanka.

**Magdhawga Shaqaalaha.** Laga yaabee in aan u sii daayno macluumaad caafimaad ee kugu saansan sida maamulka shaqaalaha magdhawga ama qorshooyin la mid sida ay awood u siinayso sharciga Vermont. Qorshooyinkaani waxay siinayaan faa'idooyin dhaawacayadda la xiriira shaqadda ama jirooyin.

**Halista Caafimaadka Dadweynaha.** Laga yaabee in aan u bandhigno macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan hawlqabadyadda caafimaadka dadweynaha. Hawlqabadyadaani guud ahaan waxaa ka mid ah waxa soo socda:

- Ka hortagga ama xakameynta cudurradda, dhaawaca ama naafonimadda;
- Ka warbixnta geerida;
- Ka warbixnta ku xadgudubka ilmaha ama dayicidda;
- Ka warxbixinta xadgidubka, dayaca ama dadka waaweyn ee liita oo la isticmaalay; tuhun kastoo ku xadgudub ah, dayac, ama isticmaalidda dadka da'da ah (60jir ama ka weyn), ama qof weyn oo naafo ah lagu sheegay ama dhimir ahaan ka dhaawacan, waa in la soo sheegaa;
- Ka warbixnta saameynta daawooyinka ama dhibaatooyinka wax soo saarkaasi;
- Cadeynta shaqsiyaadka soo xasuusanaaya waxlxaha laga yaabo in ay isticmaalayaan;
- Cadeynta shaqsiyaadka lagu sheegay cudurro ama halis u ah inay qaadaan ama faafiyaan cudurradda leyska qaado ama xaaladaha

**Waxqabadyadda aan La Ogaan ee Caafimaad.** Waxa laga yaabaa in aanu siino macluumaadka caafimaadka wakaalada kormeerka caafimaadka, sida Wakaalada Vermont ee Adeegyada Aadanaha Waaxyaha Caafimaadka Maskaxda, Naafada, Gabowga iyo Nolol Madaxbanaan iyo Caafimaadka oo aanu qandaraas kula galno, hawlaha uu sharcigu ogolyahay. Hawlahan korjoogteynta waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, xisaabin, baaritaanno, kormeerid, iyo shati-siin. Hawlahani waxay lagama maarmaan u yihiin dawladda si ay ula socoto nidaamka daryeelka caafimaadka, barnaamijyada dawladda, iyo u hoggaansanaanta sharciyada xuquuqda madaniga ah. Waxaa laga yaabaa inaan siino macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan adiga oo aan ogolaansho u haysan Xoghayaha Waaxda US Department of Health and Human Services iyo/ama Xafiiska Xuquuqda Madaniga marka ay samaynayaan dib u eegis u hogaansanaan, baadhis ama tallaabo dhaqangelin ah ama warbixinta khasabka ah ee jebinta macluumaadka caafimaadka.

**Fullinta Sharciga**. Waxaan u siideyn karnaa warbixintaada caafimaadka saraakiisha fullinta sharciga sida looga baahanyahay ama loogu hogaansamo amarka maxkamada ama raadino damaanada. Waxaan sidoo kale u siideyn karnaa warbixin xadidan saraakiisha fullinta sharciga si aan u soo wargelino dambiga lagu sameeyay dhismooyinkeena ama aqoonsashada qofka lunsan ama laga shakisanyahay inuu ku caawiyo baaritaanka dambiga.

**Ficilladda Sharci iyo Muran.** Haddii aad ku lug yeelato dacwad maxkamadeed ama muran sharci, waxaan shaacin karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan annagoo ka jawaabayna amar maxkamadeed ama amar maamul. Dacwado sharciyeed qaarkood, waxaa jira habraacyo gaar ah oo nalaga rabo inaan raacno ka hor inta aan la shaacin diiwaannada daaweynta la xiriira isticmaalka maandooriyaha.

**Saraakiisha Caafimaadka Dadweynaha iyo Agaasimayaasha Guryaha Janaasada.** Laga yaabee in aan soo bandhigno gees ahaa ama baaritaan daawo. Tani waxay noqon kartaa mid muhiim ah, tusaale ahaan cadeynta qofka marxuumka ah ama go'aan ka gaarista sababta dhimashadda. Xittaa laga yaabee in aan sii daayno macluumaad caafimaad agaasimayaasha janaasadda halkaasoo ay iyaga u fasaxeyso inay hawlahoodda sii wataan.

**Shaqsiyaadka Xabsi ku Jira.** Haddii aad tahay maxbuus ku jira machadka dhaqan celinta, ama aad ku hoos jirto xabsi saraakiisha xoojinta sharciga, laga yaabee in aan u sii dayno macluumaad caafimaad ee kugu saabsan machadka dhaqan celinta ama saraakiisha xoojinta sharciga tixraacidda daryeel ku siinayaan inta aad ku jirto xabsiga. Sideyntaani waa lama huraan (1) machadka inuu ku siiyo daryeel caafimaad; (2) difaaca caafimaadkaaga iyo badbaadada ama caafimaadka iyo badbaadada kuwa kale; (3) badbaadada iyo amniga machadka dhaqan celinta.

**Daryeelka Caafimaadka Taranka iyo Midka Xaqiijiya Jinsiga.** Diiwaannada caafimaad ee la xiriira daryeelka taranka iyo daryeelka xaqiijiya jinsiga waxaa ilaaliya sharciyada qarsoodiga iyo ilaalinta ee heer gobol.

“Adeegyada daryeelka caafimaadka taranka” waxaa loola jeedaa dhammaan sahayda, daryeelka, iyo adeegyada nooc kasta ha ahaadeene caafimaad, dabeecad-caafimaad, caafimaad maskaxeed, qalliin, cilmi-nafsi, daaweyn, ogaansho, ka-hortag, soo-kabasho, ama taageero oo ay ku jiraan dawooyin, kuwaas oo la xiriira uur, ka-hortagga uurka, taran la caawiyo, maareynta lumista uurka, ama joojinta uurka.

“Adeegyada daryeelka caafimaadka ee xaqiijiya jinsiga” waxaa loola jeedaa dhammaan sahayda, daryeelka, iyo adeegyada nooc kasta ha ahaadeene caafimaad, dabeecad-caafimaad, caafimaad maskaxeed, qalliin, cilmi-nafsi, daaweyn, ogaansho, ka-hortag, soo-kabasho, ama taageero oo ay ku jiraan dawooyin, kuwaas oo la xiriira daaweynta dhibaatada is-waafajin la’aanta jinsiga iyo is-waafajin la’aanta jinsiga.

Ma shaacin doono diiwaannada noocan ah si loogu adeegsado dacwad kasta oo madani, dambi, dhaxal, maamul, ama sharci-dejin, ama jawaab ahaan codsiyo ka imanaya hay’ado ka baxsan gobolka—oo ay ku jiraan amarro maxkamadeed ama soo-yeerid illaa ay shaacintu noqoto: (1) mid aad adigu oggolaato; (2) mid ay qasab ka dhigaan shuruucda Vermont ama federaalka; ama (3) mid ay ku khasabto amar maxkamadeed oo ka socda Vermont oo ay ku jirto caddeyn muujinaysa sabab macquul ah. Ka hor inta aan diiwaanno lagu shaacin amar maxkamadeed, maxkamaddu waa inay si cad diiwaanka caddaynta ugu xaqiijisaa in sabab macquul ah jirto isla markaana ay qeexdo diiwaannada la shaacinayo. Ka reebista kale ee kaliya waa shaacinta loo sameeyo Guddiga Dhaqanka Caafimaadka ee Vermont ama Xafiiska Xeerarka Xirfadaha marka ay jiraan baaritaanno dhab ah, iyo shaacinta loo sameeyo Waaxda Caafimaadka ee Vermont ama Waaxda Naafada, Waayeelka, iyo Nolosha Madaxbannaan ee Vermont marka ay jirto baaritaan dhab ah oo ku saabsan xarun daryeel caafimaad oo shati ka haysata Vermont.

**Habaynta Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan.**

Xarunta Howard waxay ka qaybqaadataa Habaynta Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan ("OHCA") iyadoo la raacayo Heshiiska Nidaamka Gobolka ee Adeegyada Dhibaatooyinka ee Bulshada ee Moobilada (“Barnaamijka CMCS”) oo ka mid ah Adeegga La-talinta ee Degmada Addison, Inc.; Xarunta Clara Martin, Inc.; Adeegga La-talinta ee Midaysan ee Degmada Bennington, Inc.; Adeegyada La-talinta iyo Taageerada Northwestern, Inc.; Xarunta Howard, Inc.; Adeegga Caafimaadka Dhimirka ee Degmada Lamoille, Inc.; Adeegyada Aadanaha ee Waqooyi-bari Boqortooyada, Inc.; Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Rutland, Inc.; Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Degmada Washington, Inc., iyo Adeegyada Daryeelka iyo Dib-u-habaynta Caafimaadka ee Southeastern Vermont, Inc. (oo wadajir ah, "Ka-qaybgalayaasha Dhibaatooyinka ee Moobilada ee OHCA"). Waxaan si wada jir ah uga wada shaqeynaa hawlgallo wadaag ah si aan u bixinno adeegyada dhibaatooyinka ee moobilada iyo hawlaha dheeraadka ah oo ay ku jiraan maaraynta kheyraadka, warbixinta, hubinta tayada, maaraynta isticmaalka, tignoolajiyada macluumaadka, iyo biilasha. si loo bixiyo adeegyo degdeg ah oo ku salaysan bulshada oo ku salaysan dhibaatooyinka moobilada.

Iyada oo qayb ka ah OHCA-dan Dhibaatooyinka Moobilada, Ka-qaybgalaha OHCA ee Dhibaatooyinka Moobilada ayaa isweydaarsan kara PHI-gaaga marka loo baahdo si loo fuliyo hawlgallada iyo hawlaha la wadaago ee Barnaamijka CMCS.

Ka-qaybgale kasta oo ka tirsan OHCA Crisis Mobile Crisis wuxuu ahaanayaa hay'ad sharci oo gaar ah wuxuuna si gaar ah mas'uul uga yahay gudashada waajibaadkiisa sharciga ah ee hoos yimaada HIPAA iyo sharciyada kale ee asturnaanta ee khuseeya. Ogeysiiskani wuxuu sharxayaa sida Xarunta Howard iyo, marka ay ka shaqeyneyso Mobile Crisis OHCA, ay u isticmaali karaan una shaacin karaan PHI-gaaga iyo xuquuqda aad u leedahay macluumaadkaas. Marka sharciyada kale, sida sharciyada sirta ah ee caafimaadka dhimirka ee Vermont ama 42 C.F.R. Qaybta 2 ee maamula diiwaannada khalkhalka isticmaalka maandooriyaha

qaarkood, ay siiyaan ilaalin dheeraad ah macluumaadkaaga, Xarunta Howard iyo Mobile Crisis OHCA Ka-qaybgalayaasha waxay raaci doonaan sharciyadaas mana isticmaali doonaan ama ma shaacin doonaan macluumaadkaaga siyaabo aysan sharciyadaasi u oggolaanayn.

ISTICMAALIDDA MACLUUMAADKA CAAFIMAAD EE U BAAHAN RUQSAD QORAAL

Isticmaal kasta ama faafin kale oo ku saabsan macluumaadka caafimaadka oo aan lagu daboolin ogeysiiskan ama sharciyada na khuseeya, waxaa la samayn doonaa oo keliya marka aad bixiso oggolaansho qoraal ah. Tusaalooyin arrintan ka mid ah waxaa noqon kara macluumaadka daaweynta isticmaalka maandooriyaha, faafinta loo sameeyo qareennada (marka laga reebo qareennada hay'addan u gaarka ah), loo-shaqeeyayaasha, Xafiiska Go'aaminta Adeegyada Naafonimada ee Vermont, ama dad kale oo aad taqaanid balse aan ku lug lahayn daryeelkaaga. Intaa waxaa dheer, isticmaalka iyo faafinta macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo ujeeddooyin suuq-geyn ah, iyo faafinta loo arko iibinta macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo, waxay u baahan yihiin oggolaansho. Haddii aad na siiso oggolaansho aan ku isticmaalno ama ku faafino macluumaadkaaga caafimaad, waxaad ka noqon kartaa oggolaanshahaas wakhti kasta adigoo qoraal ku sameeya. Haddii aad ka noqoto oggolaanshahaaga, mar dambe ma isticmaaleyno mana faafinayno macluumaadkaaga caafimaad ujeeddooyinka ku xusan oggolaanshahaaga qoraalka ah. Waxaad fahmaysaa inaanan dib u celin karin faafin kasta oo horay loo sameeyay annagoo haysanna oggolaanshahaaga, isla markaana nalaga rabo inaan sii hayno diiwaannada adeegyada aan kuu fidinnay. Waxaad fahmaysaa in macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo ee la faafiyo laga yaabo in dib loo sii faafiyo hab aan mar dambe hoos iman ilaalinta HIPAA.

**Kooxyada Caafimaadka Bulshada ("CHT").:**: Kooxyadaa waxaa lagu abuuray sida waafaqsan Vermont Blueprint ee Caafimaadka iyo waxaa loo naqshadeeyay in ay abuurta isbaheysiga u dhaxeeyo bixiyaasha daryeelka caafimaadka, hay'adaha deegaanka iyo gobolka iyo hay'adaha taageerada bulshada kuwaas oo ka go'an hormarinta tayada nolosha ilaa xiriirinta adeegyada. Adeegyadaan waxaa laga yaabaa in ay yihiin dabiici ahaan dhaqaaale, jirka, dareenka ama waxbarashada. Daaweyntaada bixiyaasha daryeelka caafimaad waxaa laga yaabaa in ay wadaagaan kaliya warbixintaada caafimaad iyo CHT haddii aad bixisay ogolaansho gaar ah oo qoran ee wadaagis ah.

XUQUUQDAADA LA XIRIIRTA MACLUUMAADKA KUGU SAABSAN

*Taageero kasta ( goob ahaan, isgaasiineyd, iwm.) waxaad u baahan tahay inaad ka shaqeysiiso xuquuqdaada ee ay ku siinaayso hayadda.*

Waxaad leedahay xuquuqyadaan soo socda ee la xiriira macluumaadka ee aan kuu hayno:

**Xaqqa Dulmarid iyo Nuqul ka sameyn.** Waxaad xaq u leedahay inaad dib u eegto oo aad hesho nuqul ka mid ah macluumaadkaaga caafimaad ee loo isticmaali karo go'aannada ku saabsan daryeelkaaga. Tan waxaa ku jiri kara labadaba diiwaannada caafimaadka iyo kuwa lacag-bixinta. Waxaan ka go'an tahay inaan ka jawaabno codsiyadaada helitaanka macluumaadkaaga caafimaad sida ugu dhaqsaha badan, annagoo aan sameyn dib-u-dhac aan loo baahnayn. Sida uu qabo HIPAA, waxaa nalaga doonayaa inaan ku siino helitaanka diiwaannadaada 30 maalmood gudahood marka aad codsato. Haddii diiwaannadaadu aysan si fudud u heli karin, waxaan kordhin karnaa muddadan ilaa 30 maalmood oo dheeraad ah, balse waxaan ku ogeysiin doonnaa qoraal ah sababta dib-u-dhaca. Sidoo kale, waxaad codsan kartaa in diiwaannadaada loo diro qof ama hay'ad kale oo aad doorato.

Si aad dib ugu eegto ama u hesho nuqul ka mid ah macluumaadkaaga caafimaad, waa inaad codsigaaga ku soo gudbisaa qoraal ahaan dhakhtarkaaga ama Waaxda Macluumaadka Caafimaadka (Howard Center, 300 Flynn Ave, Burlington, VT 05401). Haddii aad codsato nuqul ka mid ah macluumaadka, waxaa laga yaabaa inaan kaa qaadno lacag macquul ah oo ku saleysan kharashka, sida nuqul ka qaadista, dirista boostada, ama

qalabka la xiriira codsigaaga. Haddii aad codsato nuqul elektaroonig ah oo qaab ama qaabeyn gaar ah leh oo ka mid ah diiwaankaaga caafimaad, isla markaana aannaan si fudud ugu diyaarin karin qaabkaas ama qaabeyntaas, waxaan kula shaqeyn doonnaa si aan kuu siino qaab ama qaabeyn kale oo ku habboon nuqulka elektaroonigga ah..

Waxaa jira xaalado kooban oo aan ku diidi karno codsigaaga ah inaad kormeerto ama aad hesho nuqul ka mid ah macluumaadkaaga caafimaad..

**Xaqqa Wax ka Bedelka.** Haddii aad dareemeyso in macluumaadka caafimaad ee aan kaa hayno inay sax aheyn ama aan dhameystirneyn, waadna weydiin kartaa in aan wax ka bedelno macluumaadka. Waxaad xaq u leedahay in aad codsato wax ka bededelidda inta macluumaadka uu ku xafidan yahay ama hayadda.

Codsiga wax ka bedelidda, caodsigaaga waa in uu ahaado qoraal una soo qudbisaa qoraayga aad dooneyso in uu wax ka bedelo ama Waaxda Macluumaad Caafimaad (Howard Center, 300 Flynn Ave Burlington, VT 05401).waxaa raacsan, waa in aad bixisaa sabab taageereyso codsigaaga.

Laga yaabee in aan diidno codsigaaga wax ka bedelidda haddii aysan ahyen qoraal ama aanan raacsaneyn sabab taageereyso codsigaasi. Sidoo kale, waan diideynaa codsigaaga haddii aadna weydiiso in aan wax ka bedelno macluumaad kaasi:

- Oo aananag sameynin, illamaa qofka ama guddiga sameeyay macluumaadka aanan la heli karin si ay wax ugu bedelaan;
- Aanna aheyn qeyn ka mid ah warbixinta keyd loo xushay ama hayadda;
- Aanan aheyn qeyb ka mid ah macluumaadka aad fasaxday in la baaro iyo nuqul laga sameeyo; ama,
- Oo ah fikir sugan ama kaamishay hayadda.

**Xaqqa Xogogaanshaha soo Bandhigyada**. Waxaad xaq u leedahay in aad codsato "xogogaanshaha soo bandhigyadda." Kani waa liiska soo bandhigyadda aan ka sameynay macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan kuwaasoo sharciga u baahaniy/ama aan kuu fasaxeynin. Liiska siideynada kuma jireyso siideynada loo sameeyay ujeedooyinka daaweynta, lacag bixinta adeegada daaweynta ama howlaha daryeelka caafimaadka la xiriiro ee adeegyada daaweynta.

Codsasahdda liiskan ama xogogaanshaha soo bandhigidda, waa in aad ugu soo gudbisaa codsigaaga qoraal ahaan Waaxda Macluumaad Caafimaad (Howard Center, 300 Flynn Ave Burlington, VT 05401). Codsigaaga waa ina ay ku caddaha muddo waqti, oo aanan ka dheereyn lex sanno. Codsigaaga waa in ay ku caddahay qaabkeed ku rabtaa liiska (tusaale, warqad ahaa, danab ahaan). Liiska ugu horeeyay ee aad codsaneyso muddo 12 bilood dhexdeeda waa lacag la'aan. Liisaska dheeriga ah, waxaan kugu sheeganeynaa kharsh qiimaha siinta liiska. Waan kugu wargelin doonnaa qiimahooda waadna dooran kartaa in aad ka noqoto ama aad soo bedesho codsigaaga ka hor waqtiga wax lagaa qaadin.

**Xaqqa Codsashadda Xadidaadda.** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato adkeynta am xadidaadda macluumaad caafimaad ee aan isticmaaleyno ama aan soo bandhigeyno ee ku saabsan daaweyntaada, kharsah bixinta, ama hawlgalyadda daryeel caafimaad. Mana looga baahna in aan kugu raacno codsigaaga illamaa codsigaaga uu xadeynaayo soo bandhigyadda qorshaha caafimaad ee sababta loo bixinaayo kharash bixinta ama hawlgalyadda daryeel caafimaad kaasoon aheyn si kale ugu baahneyn sharciga adiga ama qof kale oo kaa metelaaya waxaan ka aheyn qorsho caafimaad oo u bixiyay hawlgalyadaan si buuxda goortii hawlgalyadda caafimaad lagu siiyay. Si kastaba ha ahaatee, haddii aan kugu raacno xadeynada la codsaday ama xadeynta, waxaan tixgelineynaa codsigaaga illamaa macluumaadka loogu baahdo inay bixiso daaweyntaadda deg deg ah.

Xittaa waxaad leedahay xaqqa ah in aad codsato xadididda macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan ee aan u soo bandhigeyno qof kale kaasoo ku lugu leh daryeelkaaga ama kharash bixinta daryeelkaaga, sida xubin qoys. Tusaale ahaan, waad na weydiin kartaa in aan isticmaalin ama bandhigid macluumaad ku saabsan qeybaha la talin ee aad heleyso.

Codsashadda adkeynta, waa in aad ku sameysid codsigaa qoraal ahaan shaqaalaha soo gelaayo ama daryeele caafimaadkaaga. Codsigaaga, waa in aad noo sheegtaa (1) macluumaadkeed rabtaa in la xadido; (2) inaad rabto in la xadido isticmaalkeena, bandhigyadda ama labaddaba; iyo (3) yaad rabtaa in lagu dabaqo xadidaada, tusaale, u bandhigiyadda lamaanahaaga.

**Xaq u Lahaanta Isgaarsiinta Codsi Qarsoodi.** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in aan kugula soo xiriirno arrimaha ku saabsan caafimaadkaaga qaabab qaar ama goobo qaar, tusaale, waxaad na weydiisan karta in aan kaala soo xiriirno oo keliya shaqadda ama farriin-danabeed.

Codsashadda isgaarsiineeyd inay qarsoodi ahaato, waa in aad codsigaaga u soo qortaa qoraal ahaan shaqaalaha soo galaayo ama xaruun ddaryeelahaaga. Kuma weydiineyno sababta codsigaaga. Waan soo dhaweyneynaa dhammaan codsiyadda mac quulka ah, codsigaaga waa in uu qeexaa sida ama meesha aad jeceshahay in lagaala soo xiriiro.

**Xaqqa nuqul Warqadeed ee Ogeysiintaan.** Waxaad xaq u leedahay nuqul warqadeed ee ogeysiintaa. Waxaadna weydiin kartaa nuqulkaaga ee ogeysiinta hadda ah goor kasta. Helida nuqul warqad ee ogeysiintaan, la xiriir Sarkaal Shaqsiyeedka XaruntaHoward (802) 488-6900

**Isticmaalka Sirdoonka Macmalka ah**. Barnaamijkeennu wuxuu isticmaali karaa tignoolajiyada sirdoonka macmalka ah (AI) si ay uga caawiso falanqaynta iyo maareynta macluumaadkaaga caafimaad, loona hagaajiyo daryeelkaaga iyo hawlaha barnaamijka. Marka qalabka AI ay helaan macluumaadkaaga caafimaad, waxaan hubinnaa inay helaan oo keliya wixii loo baahan yahay hawsha la qabanayo, isla markaana la raaco dhammaan ilaalinta asturnaanta iyo amniga ee sharcigu farayo.

AI waxay naga caawisaa ogaanshaha qaabab, hagaajinta go'aan-qaadashada caafimaad, iyo ka caawinta hawlaha maamulka. Si kastaba ha ahaatee, AI ma beddesho xukunka ama go'aan-qaadashada bixiyahaaga daryeelka caafimaad. Dhammaan go'aannada ugu dambeeya waxaa gaara bixiyahaaga daryeelka caafimaad, iyagoo ku saleynaya khibraddooda xirfadeed.

Isticmaalka AI si adag ayaa loo xakameeyaa, macluumaadkaagana wuxuu ahaanayaa mid qarsoodi ah, iyadoo la raacayo HIPAA iyo sharciyada kale ee khuseeya.

**Amniga Macluumaadka Caafimaadka**.

Waxaan u diyaarinay ilaalin ku haboon si ay u difaacdo una xafiddo qarsoodinimadda macluumaadka caafimaadkaaga. Qaabka dabci ee ku saleysan hawlgalyadda ficilladda bulshadda, Wakiiladda hayadda waxay haysan doonaan macluumaadka caafimaad ee ka baxsan hayadda. Arrintaan, Wakiiladda hayadda waxay xaqiijinaayaan amnigga iyo qarsoodinimadda ee macluumaadka qaab ay la kulmaayaan nidaamka hayadda, Dowladda iyo Sharciga Federaalka.

**Isbeddellada Lagu Sameeyo Ogeysiiskan**

Waxaan ilaalineynaa xaqqa lagu bedelaayo ogeysiintaan. Waxaan ilaalineynaa xaqqa lagu sameynaayo ku noqosho ama ogeysiin bedelka oo saameynaayo macluumaadka caafimaad ee aan horay u haysanay ee kugu saabsan sidoo kale macluumaadka aan heleyno mustaqbalka. Waxaan ku meeleyneynaa nuqul ogeysiinta hadda ah dhammaan goobaha hayadda. Ogeysiintaan waxay xambaarsantahay taariikhda ka bilaabaneyso.

Haddii aan wax ka bedeleyno ogeysiintaa, waxaan wax ka bedeli doonnaa kii la soo dhaafay, soo saarid ku dhawaaqis wax ka bedelida ee qeyb kastoo Howard Center.

## Cabashooyin

Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada asturnaanta la jebiyey, waxaad gudbin kartaa cabasho adigoo la xiriiraya Howard Center ama Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha. Si aad cabasho ugu gudbiso hay'adda, la xiriir: Khadka Taleefanka Cabashooyinka adigoo wacaya (802)-488-7195 ama iimayl ugu diraya compliancecomplaint@howardcenter.org

Ma laguugu ganaaxaayo xareynta eedeynta.

Xoghaynta Waaxda Hawlgalladda Caafimaadka iyo Aadami waxa kala soo xiriiri doonaan xafiis goboleedka Xafiiska Xuquuqul aadamiga, Waaxda Hawlgalladda Caafimaad iyo Aadami ee U.S, Xarunta Dowladda, J.F. Kennedy Federal Dhismaha – Qolka 1875, Boston, Massachusetts 02203, taleefoonka codka (800) 368 1019, fakis (617) 565-3809, TDD (800) 537 7697 ama iimayl ugu diraya ocrmail@hhs.gov.